

**Jamhuuriyada Somaliland**

**Golaha Wakiiladda**



## **Warbixinta**

**Wax-qabadkii Golaha Wakiiladda**

**Sanadkii 2019**

## Hordhac

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Sadexda dhar-dhaar ee Qaranku ku qotomo, sida uu ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Lagislatioin).

Golaha wakiiladu waa mid ka mida Labada Aqal ee Baarlamaanka Somaliland oo kala ah (Guurtida iyo Wakiilada) oo marka laysku daro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan, Golahan Wakiiladu waa Golihii ugu horeeyey ee ku yimaada qaab doorasho toos ah isaga oo dhamaystiray hannaankii dimuquraadiyadeed Jamhuuriyada Somaliland, Golahan oo ah Golihii 4<sup>aad</sup> (afraad) oo ay ka horeeyeen saddex Gole oo ku yimi qaab Beeleed (xulasho). Halka Golahan ahaa kii ugu horeeyay ee ku yimaada Cod shacab Doorashadii 2005tii.

Golaha Wakiiladu waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa inay yihiin Xubno ka wakiil ah Dadweynaha, waana qeybta 1<sup>aad</sup> ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Ilaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soosaarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39<sup>aad</sup>, Qodobka 53<sup>aad</sup>, Qodobka 54<sup>aad</sup> iyo Qodobka 55<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Intii lagu jirey Sanadkii 2019kii Golaha Wakiiladu wuxuu yeeshay Sadadex Kal-fadhi oo Caadiya, sidaa darteed Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa waxqabadka Golaha Wakiiladda Sanadkii dhamaadey ee 2019kii oo ka kooban Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay, kuwa dhaqan-galey, Masuuliyiintii la ansixiyay, Go'aanadii Goluhu gaadhey, Wixii Gudiyaddu qabteen iyo waxyaabo kale si aad u xusuusataan ugana qiyaas-qaadataan qorshaha hawlaha Golaha sanadkan Cusub ee 2020ka una dardar-galino Goluhu Qaranka u hayo.

Sanadkii 2019kii saddexda Kal-fadhi ee Goluhu yeeshay waxay fadhiyadiisu isugayn ahaayeen 82 fadhi, sidaa darteed Warbixintani waxay xambaarsan tahey wax-qabadkii sanadkaas oo ka kooban iyo waxyaabihii u soo kordhay Golaha Wakiiladda. Warbixintani waxay xuseysa hawl kasta iyo dhacdo kasta iyadoo taariikheysan maalinta ay dhacdey iyo wixii ka soo baxay.

### Kal-fadhiyadii Golaha ee 2018ka

No.	Kal-fadhiga	Taariikhda
-----	-------------	------------

1.	Kal-fadhigii 39 <sup>aad</sup>	09/03/2019 ilaa 10/05/2019
2.	Kal-fadhigii 40 <sup>aad</sup>	22/06/2019 ilaa 17/09/2019
3.	Kal-fadhigii 41 <sup>aad</sup>	25/11/2019 ilaa 14/12/2019

### Fadhiyada ay Goleweynaha iyo Gudiyadu fadhiisteen

1.	Fadhiyada Goleweynuhu	82 Fadhi
2.	Fadhiyada Gudidda Joogta	19 Fadhi
3.	Fadhiyada Gudiyada kale	23 Fadhi
	<b>Isugeyn</b>	<b>124 Faadhi</b>

### Warbixinada Golaha laga hor akhriyay

Taariikhda	Warbixinta	cid akhridey
17/03/2019	Warbixinta Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiilada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiyahe Xigeenka Guddida Joogtada iyo Anshaxa
17/03/2019	Warbixinta Shir-guonka ee Kal-fadhigii 38aad	Mr. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee G/Wakiilada
31/03/2019	Warbixinta Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada ee Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka	Md. Siciid Cilmi Rooble Gudoomiyaha Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada
08/04/2019	Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Wax ka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23	Md. C/laahi Xuseen Cige Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Gudaha
29/06/2019	Warbixinta Gudidda Joogta	Md. Axmed Ducaale Gud. Ku-xigeenka Gudidda Joogtada
29/06/2019	Warbixinta Shir-gudoonka Kal-fadhigii 40aad	Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha
27/07/2019	Warbixinta Gudidda Deegaanka ee Xeerka Macdanta	Gudoomiyaha Gudidda Deegaanka Md. Maxamed Yuusuf Waabeyo
15/10/2019	Warbixinta Shir-gudoonka Kal-fadhigii 41aad	Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha
15/10/2019	Warbixinta Waftigii Golaha Wakiilada ka qaybgalay Shirweynahihii Ururka Barwaaqo Sooranka (Commonwealth) ee Dalka Uganda ka dhacay	Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibadda Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe)

02/12/2019	Warbixinta Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Xisaab Xidhkii Miisaaniyada Sanadkii 2017kii	Gudoomiyaha Gudidda Md. Ibraahim Mahdi Buubaa.
--/12/2019	Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Odoroska Miisaaniyada 2020ka.	G Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaalaha Md. Cumar Axmed Saleebaan Sanweyne

### **Xeerarka Madaxweynaha u gudbey si uu dhaqan-galiyo**

<b>No</b>	<b>Xeerka</b>	<b>Taariikhda</b>	<b>Loo Gudbiyay</b>
1.	Xeerka Xawaaladaha	01/04/2019	Madaxweynaha
2.	Wax-ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Booliska	13/04/2019	Madaxweynaha
3.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka	30/11/2019	Madaxweynaha
4.	Xeerka ka hortaga Maydhaanka Lacagaha	22/07/2019	Madaaxweynaha
5.	Wax-ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka	09/12/2019	Madaaxweynaha
6.	Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada	08/12/2019	Madaxwaunaha

### **Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee 2018kii Guurtida ku maqnaa.**

<b>No</b>	<b>Xeerka</b>	<b>Taariikhda</b>
1.	Xeerka Garyaqaanka Guud ee Somaliland	01/12/2019
2.		

## Ansixinta Masuuliyiinta Qaran

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	C/risaaq Cali Ayaan	Wasiirka W. Cadaaladda	21/07/2019
2.	Cumar Cali C/laahi	Wasiirka W. Caafimaadka	21/07/2019
3.	Cabdinaasir Caydiid Mxamed	Wasiir ku-xigeenka W. A. Gudaha	21/07/2019
4.	Farxaan Aadan Haybe	Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha	21/07/2019
5.	Maxamuud Daahir Jaamac	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019
6.	C/raxman Max'ed Ismacil (Dixood)	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019
7.	Xasam Yuuusuf Ducaale	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019
8.	Mustafe Maxamed Daahir	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019
9.	Kaltuun Xasan Cabdi	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019
10.	C/rashiid Maxamuud Cali	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019
11.	Maxamuud Siciid Dalmar	Xubin Komishanka Doorashooyinka	12/11/2019

## Fadhiyo Wada-jir ah iyo Khudbadsanadeedkii Madaxweynaha

Labada Gole ee Baarlamaanka Somaliland (Guurtida iyo Wakiiladu) waxay yeesheen Fadhi oo wada jir ah **24 March 2019** oo uu Madaxweyne Md. Muuse Biixi Cabdi uu Golaha ka hor akhriyay khudbad sanadeedkiisii Dastuuriga ahaa ee sanadka 2019. Madaxweynuhu wuxuu Mudanayaasha labada Gole u jeediyay Khubad taabanaysa Dhinacyo badan sida Siyaasada Arrimaha Dibada iyo Maal-gashiga Caalamiga ah, Siyaasadda Arrimaha Gudaha, Siyaasada Arrimaha Bulshada ee Caafimaadka iyo Waxbarashada, Sidoo kale wuxuu Ka hadlay Doorashooyinka.



## **Ansixinta Miisaaniyadii Sanadka 2020ka**

**29 November 2019**kii Waxa Golaha Wakiilada la horkeenay odoroska Miisaaniyada Qaranka ee sanadkii 2020, Waxana Warbixinta Miisaaniyadaas ka hor akhriyay Golaha Wasiirka Wasaarada Maaliyada **Dr. Sacad Cali Shire** oo Guud ahaan uga warbixiyay Xildhibaanada Xogta ay xambaarsan tahay Odoroska Miisaaniyada 2020ka

Miisaaniiniyad sannadeedka 2020-ka ayaa Wasiirku sheegay in cadadkeedu dhan yahay **2,751,304,880,098 (Laba Tiriliyan, Toddoba boqol kow iyo konton Bilyan, daddex boqol iyo afar milyan, siddeed boqol iyo siddeetan kun iyo siddeed iyo sagaashan shilin)**, waxana ay **18% (Boqolkiiba siddeed iyo toban)** ka badan tahay miisaaniyad-sannadeedkii 2019-ka.

Intaas ka dib, waxa sidii caadadu ahayd lagu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada si ay waajibkooda sharci uga soo gutaan Golahana warbixin uga soo siiyaan Miisaaniyada, iyadoo Gudiddu markii lagu wareejiyay Miisaaniyada soo baadhay isla markaana su'aalo ka soo waydiisay hay'addaha qaarkood sida Wasaarada Maaliyada, waxayna Warbixintooda iyo soo jeedimo ay Golaha u soo gudbiyeen 25/11/2019. Intaas ka dib wuxuu Goluhu Miisaaniyada ka yeeshay dood dheer iyo falanqayn.

Waxaana ugu dambeyntii Golaha Wakiiladu Odoroska Miisaaniyada 2020 oo wax ka badal iyo kaabis ay ku sameeyeen Ansixiyeen 30/11/2019.oo Fadhiga Golaha ay ka soo xaadireen 51 Mudane, waxana Ansixinta Miisaaniyada oo la raaciyay soo jeedimaha ogolaaday 42



Mudane, waxaana diiday 7 Mudane, halka 1 Mudane uu ka aamusay, sidaasna wuxuu Goluhu ku meelmariyay Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Sanadka 2020ka.

### **Ansixinta Xisaab Xidhka Miisaaniyadii Sanadkii 2017**

8 December 2019 Golaha Wakiilada Somaliland wuxuu Ansixiyay Xisaab-xidhka Miisaaniyadii 2017kii Hant-dhowaraha Guud Golaha u soo gudbiyay isla markaana Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida-qaranku ay Golaha Warbixin ka siisay Goleweynaha 02 December 2019 ka dib markii sida sharcigu dhigayo ay soo baadhay soona hubisay, wuxuu Goluhu Xisaab xidhkaas ku ansixiyay 08 December 2019 fadhi ay ka soo xaadireen 42 Mudane, waxaana ansixinta Xisaab Xidhkaas ogolaaday 28 Mudane, halka 11 Mudane ka diideen, 2 Mudane ay aamus ku codeeyeen.

## Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah

### Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan

No	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Dhakhliga Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
3.	Wax ka badalka Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
4.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
5.	Wax ka badalka Xeerka Doorashada Guud iyo D/galinta	Gudidda Arrimaha Gudaha
6.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
7.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
8.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Cigaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
9.	Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka	Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

### Go'aanada Goluhu Gaadhey Sanadkii 2018kii

No	Go'aanka Goluhu Gaadhay	Tar go'aanka	U gudbay
2	Go'aanka ansixinta xeerka Xawaaladaha	01/04/2019	Madaxwayanaha
3	Go'aanka ansixinta wax ka bedelka , kaabista xeerka ciidanka Booliska	23/03/2019	Madaxwaynaha
4	Go'aanka ansixinta, wax ka bedelka Xeerka Nidaamka Garsoorka	29/04/2019	Golaha Guurtida
5	Go'aanka ansixinta Xeerka ka hortaga Maydhitaanka Lacagta	22/07/2019	Madaxwaynaha
6	Go'aanka ansixinta wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka	20/07/2019	Golaha -Guurtida
7	Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dwlada	21/07/2019	Madaxwaynaha
8	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Cadaalada	21/07/2019	Madaxwaynaha
9	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Caafimaadka	21/07/2019	Madaxwaynaha
12	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku-Xigeenka Arimaha Dibada	21/07/2019	Madaxwaynaha
13	Go'aanka Ansixinta Xeerka Hawl-Gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka	27/10/2019	Golaha Guurtida
14	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha



15	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha
16	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha
17	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha
18	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha
19	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha
19	Go'aanka ansixinta Xubin Gudida Doorashooyinka Qaranka	12/11/2019	Madaxwaynaha
20	Go'aanka ansixinta Xeerka Macdanta	20/11/2019	Madaxwaynaha
21	Go'aanka Wax ka bedalka Xeerka Nidaamka Garsoorka	30/11/2019	Madaxwaynaha
22	Go'aanka Miisaniyada Qaranka 2020	30/11/2019	Madaxwaynaha
23	Go'aanka Ansixinta Xeerka Garyaqaanka Guud ee Somaliland	01/12/2019	Golaha Guurtida
25.	Go'aanka Ansixinta Xisaab Xidhkii Miisaaniyada 2017kii	08/12/2019	Madaxwaunaha
26.	Go'aanka Ansixinta Wax Ka badalka iyo Kaabsita Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka	09/12/2019	Madaxwaunaha

## **Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada**

Guddidayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Guddida Joogtada iyo Anshaxa.
2. Guddida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Guddida Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
5. Guddida Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Guddida Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.
8. Guddida Sirdoonka iyo Nabadsugida.
9. Guddida Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Guddida Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

Gudiyadda Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha, iyada oo gudi walliba Golaha u qaabilsan tahay shaqooyin gaar ah.

Sidaa darteed, waxay Gaolaha uga soo warbixiyaan Masuuliyiinta la ansixinayo ee ay Xukuumadu soo magacawdo ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxay ka soo shaqeeyaan Xeerarka qabyada ah markuu marayaan heerka guddida (committee stage), waxay la xisaabtamaan hay'addaha Xukuumada gudi walba intay qaabilsan tahay iyagoo matalaya Golewaynaha, hadaba waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii iyo masuuliyiintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

### **Guddida Joogtada iyo Anshaxa**

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro.

Guddida Joogtada iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee xil-gudashada hawlaha Qaran, iyadoo ka duulaysa muhiimada ay leeyihiin hawlaha qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaani ee Dawlada, Waxa ay Mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida.

### **Waxay kulamo Xog-waraysi Guddidu la yeelatay Masuuliyiintan:-**

- Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga Warshadaha Iyo Dalxiiska Ee JSL 21/05/2019
- Wasiirka Wasaaradda Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Biyaha Ee Jsl 25/05/2019
- Wasiirka Wasaaradda Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Ee Jsl 28/05/2019

- Warbixin kooban ee booqashada wafti ka socda baarlamaanka Uganda oo Golaha Wakiilada soo booqday 16/05/2019
- Wasiirka Wasaaradda Waxbarshada iyo Sayniska oo Gudiddu kala hadashay Cabasho Iskuulada Gaarka loo leeyahay Gudidda u soo gubiyeen
- Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada
- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka

**12/05/2019** Guddida Joogtadu waxay go'aan ka soo saartay Xadhiga Xildhibaan Dhakool iyadoo ka jawaabaya warqad Xeer-ilaaliyaha Qaranka Golaha ugu soo qoray.

### **Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka**

**12 May 2019** Gudidda Cadaaladdu waxay Safar Shaqo ku tagtay Gobolka Saaxil Gaar ahaan Jeelashada Mandheera iyo Magaalada Berbara oo ay Gudiddu u kuur galaysay xaalada Maxaabiista, Nollosha Jeelashaas iyo baahiyaha ama caqabada ka jira.

**31 March 2019** Waxay Gudidda Cadaalada iyo Garsoorku Golewaynaha u soo gudbisay Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerkaas oo Gudiddu Warbixin Golaha ka siisay Wax ka badal ay ku soo samaysay.

**25 August 2019** Waxay Gudidda Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku Kulan hawleed u qabataay Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka, kulan hawleedkaas oo ay ka soo qaybgaleen Dadweyne ka kala socday Hay'addaha Dawlada, Sharci-qayaano iyo aqoonyahan kale gaar ahaan Hay'addaha Xeerku khuseeyo, kulankaas waxa mudo laba casho ah oo uu ka socday Hotel Maansoor lagu gorfeeyay Xeerka Garyaqaanka iyo la soo jeediyay tallooyin wax ku ool ah oo Xeerka waxna laga badalay ama lagaga kaabay.

### **Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada**

**01 April 2019** Gudiddu waxay kulan la qaadatay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Md. Sacad Cali Shire.

**09 April 2019** Gudidda Dhaqaaluhu Waxay Kulan la yeelatay Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta.

**22 April 2019** Waxay Safar qaatay mudo 4 maalmood ah ku tagtay Gobolada Saaaxil iyo Tog-dheer, safarkaas oo ujeedadiisu waxay kormeerida iyo xog-ogaal u noqoshada Ilaha Dakhliga ee Dalka.

**12-16 August 2019** Waxay Safar ugu kala baxday Goobaha Dakhliga Gobolada dalka, iyadoo Gudiddu isu qaybisay laba qaybood oo kala tagay Goobaha Dakhliga Gobolada

Galbeedka iyo Goobaha Dakhliga Gobolada Bariga gaar ahaan Gobolada Saaaxil iyo Togdheer, safarkaas oo ujeedadiisu waxay kormeerida iyo xog-ogaal u noqoshada Ilaha Dakhliga ee Dalka.

### **Guddida Arimaha Bulshad iyo Diinta**

14 May 2019 Guddida Arrimaha Bulshadu Waxay Safar ku tagtay Degmooyinka Baligubadle iyo Salaxlay, iyado Guddidu booqatay Goobaha Caafimaadka Degmooyinkaas kana xogwaraystay xaalada Caafimaad iyo baahiyaha Degmooyinkaas.

**12 June 2019** Guddidu waxay kulan la yeelatay Wasiirka Caafimaadka oo Guddidu kala hadashay isla markaana Wasiirka la wadaagtay Warbixinta Xogtii Safar ay ku tageen Degmooyinka Buligubadle iyo Salaxlay.

### **Guddida Arimaha Gudaha iyo Nabadgelyada**

08 April 2019 Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu Waxay Golewaynaha u soo Gudbisay Wax ka badalka Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka ka dib markii Guddidu wax ka badal iyo naaqishaad ku soo samaysay Xeerkaas oo Xukuumadu Golaha u soo gudbisay Markii hore.

### **Guddida Arimaha Gudaha iyo Nabadgelyada**

17 May 2019 Gudoomiyaha Guddida Arimaha Dibadda ee Golaha Wakiilada Md. **Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)** oo ay weheliyaan gudoomiye kuxigeenka Guddidaas Mudane Cabdicasiis Ismaaciil Ducaale iyo gudoomiye ku xigeenka Guddida joogtada ah Mudane Axmed Ducaale bulaale iyo xubin Guddida dhaqaalaha ah Xildhibaan Axmed Maxamed Diiriye (Nac nac) ayaa kulan xarunta Baarlamaanka kula yeeshay xildhibaanoo ka socda dalka KENYA oo dalka u yimi ka qayb qaadashada maalinta dib ula soo noqoshada Madaxbanaanida Somaliland.

### **Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka**

**05/06/2019** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku safarku tagtay Gobolada dalka, safarkan oo u jeedadiisu daba socotay xogogaal u noqoshada masharaaciidkuu laga fuliyey Gobolada dalka, isla markaana ku cad xisaab xidhka 2017 ee Golaha horyaala.

**11/6/2019** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku saxafka ku tagtay Gobolka Sanaag, gaar ahaan degmooyinka Ceerigaabo, Ceel-afweyn iyo Gar'adag taas oo uu u wakiishay shirguddoonka Golaha Wakiilada, si ay xogogaal ugu noqdaan Golaha Warbixin uga keenaan xaalada dhabta ah eek a jirta degmooyinkaas aynu kor ku soo sheegnay, iyada oo Guddidu la kulantay waxaradka, Gudoomiyaha Gobolka,

Saraakiisha ammaanka ee kala duwan ee Gobolka jooga iyo masuuliyiinta degmooyinka Ceel-afweyn iyo Gar'adag.

**13/03/2019** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku la kulantay Wasiirkii hore ee Wasaarada Qorshaynta Qaranka, ay uga waraystaan shaqada culus ee Wasaaradu u hayso Qaranka, sida uu yahay nidaamka shaqo ee ay ku shaqayso Wasaaradu, kulankaas oo ku dhammaaday Isfahan iyo isla shaqayn uu la yeesho Golaha Wakiilada.

02/12/2019 Waxay Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku Golaha u soo gudbisay Warbixin ay ka soo dirarisay Xisaab-xidhkii Miisaaniyada Sanadkii 2017kii ay gacanta ku haystay, waxayna Gudiddu warbixinta Xisaab-xidhkaas ka soo jeedisay Golewaynaha iyadoo Gudoomiyaha Gudidaas Md. Ibraahim Mahdi Buubaa akhriyay Warbixintaas.

### **Gudidda Arrimaha Dibadda, Iiskaashiga Caalamiga ah iyo Q. Qaranka.**

31 July 2019 Gudidda Arrimaha Dibadda, iskaashiga caalamiga ah iyo Qorsaynta Qaranka ee Golaha Wakiilada waxay la yeelatay kulan Xarunta Golaha Wasiir ku-xigeenka ahna kusimaha Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka Mudane **Eng. Xuseen Ibraahim Buuni.**

### **Gudi gaar ah (Ad hoc Committee) loo saaray Xeer Lr. 23**

27 April 2019 Gudoomiyaha Goluhu wuxuu Gudi gaar ah (Ad hoc Committee) Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr. 23/2003, Xeerkaas oo Goluhu dood dheer ka yeeshay ayaa Gudiddaas loo xilsaaray inay isku soo guraan isla markaana isla meel dhigaan Qodobo badan oo Xeerka ah, Gudiddaasi waxay ka koobnayd:-

1. Md. Cali Maxamed Aadan (Cali Barre)
2. Md. Maxamed Cali Xirsi
3. Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf
4. Md. Xasan Muuse Hufane
5. Md. Siciid Cilmi Rooble
6. Md. C/raxman Cismaan Caalin

### **Horumarinta iyo Dar-dargalinta Hawlaha Shaqo ee Maammulka Golaha**

Tan iyo 2005, markii Golaha Wakiilada ee hadda jooga la soo doortey, Golahu wuxuu sameynayey horumar dhinacyo badan leh, hadday tahay kobcinta dhismaha xarunta GW, kor-uqaadida tayada shaqada, kobcinta aqoonta xildhibaanda iyo aqoonta shaqaalahaba.

GW oo ku guda jirey hirgalinta strategisadiisii 2aad ee 2017-2022, oo ahaa qorshe shan sanadleh, waxaa ku jirey in amniga xarunta Baarlamaanka kor looqaado (Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida) si loo sugo bad-qabka mudanayaasha, shaqaalaha, iyo martida kale ee soo booqnaysa.

Hirgalinta CCTV (kamarooyinka amniga) waxaa iska kaashaday hay'adda UNDP gaar ahaan mushruuca PSP, iyo Golaha Wakiilada oo waxaana fund-ka bixiyey SWISS fund iyo Dawlada Somaliland.

Kamarooyinka Amniga CCTV waxay qayb laxaad leh ka qaadan doonaan la socodka dhaq-dhaqaaqa guud ahaan xarunta cida ku sugan iyo hareera baarlamaanka si looga hortago khatar kasta oo dhici karta ama loo heli karo tixraac cid wax khaldan samaysa.



Hore waxaa baarlamaanku u tayeeyey qaabka loogalo baarlamaanka oo lagu xidhey qalabka qabta biraha iyo waxyaabaha kale ee mabnuuca ka ah in la'la galo baarlamaanka, waxaana hareera deyrka lagu sameeyey tower lagala socda dhaq-dhaqaaqa hareera iyo guud ahaan xarunta.

Dhamaystirka iyo hirgalinta qalabka kamarooyinka amniga waxaa qaybweyn ka qatey GW oo bixiyey kala badh qalabka lagu xidhey iyo agabka kale ee loo baahnaa si systemkani u noqdo mid si dhamaystiran u shaqeeyaa.

Ugu dambeyn 22 July 2019 ayey suurto gashey la wareegida qalabka iyada oo uu Gudoomiyaha GW Mudane Baashe Mohamed Farah kala wareegey saraakiil ka socda UNDP, gaar ahaan xafiiska Hargeysa. waxaa kale oo xaflada la wareegida ku sugnaa, Gudoomiye ku xigeenka GW mudane Ahmed Yasin Sheik Ali Ayanle, xoghaya Guud ee GW Mudane Abdirizak Saed Ayanle, agaasimaha qorsheynta GW Abdinasir Osman Mohamoud, lataliya amniga ee GW Abdirizak Ibrahim. Dhanka kale dhinaca UNDP waxaa ka socdey **Mrs Samira Hassan Iyo Mudane Mascuud Abdi.**



## Wufuudihii Dalka Yimi ee Golaha soo booqday

### Shir-gudoonka Golaha Wakiilada oo kulan la qaatay Wafti dalka Eretira ka socday oo dalka yimi

01 April 2019 Gudoomiyaha Golaha wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax oo ay weheliyaan gudi Hoosaadka arimaha Debeda ee Golaha wakiilada ayaa maanta Xarunta Golaha ku qaabiley weftigii Balaadhnaa ee Eraterian-ka ahaa ee uu hogaaminayay wasiirka arrimaha dibadda dalka Ereteriya, Mudane Cismaan Saalax Maxamed oo beryahanba safar shaqo ku joogay Somaliland.



Kulanka oo saacado dhawra qaatay ayay labada dhinac kaga wada hadleen xidhiidhka labada dal iyo sidii loo sii xoojin lahaa waxaanay shirgudoonka iyo mudanayaashii ku wehelinayay kuylanku uga xaal warameen dalka Somaliland iyo marxalada uu taagan yahay iyo inay ka go'an tahay inay gacmo furan ku qaabilayaan isbedelka geeska iyo sidii labada dal intaas isaga sii dhawaan lahaayeen.

Gudoomiyaha golaha Mudane Baashe Maxamed Faarax ayaa warbaahinta uga waramay wixii kulankaas lagaga wada hadlay iyo inuu ku soo gebogeboobay isafaham Somaliland iyo mandaqadaba muhiim u ah

### Shir-gudoonka Golaha Wakiilada oo la kulmay Weftigii EU-da

03 April 2019 Gudoomiyaha Golaha wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax, oo ay weheliyaan gudoomiye ku-xigeenka Golaha wakiilada JSL mudane Axmed-Yasiin sh. Cali Ayaanle, Gudoomiyaha gudida arimaha Gudaha Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaaki) iyo xoghayaha guud ee Golaha wakiilada Md Cabdirisaaq Siciid Ayaanle ayaa maanta kulan la qaatay weftigii safiiradda Yurub ( EU-da) ka socday ee shalay dalka safarka shaqo ku yimi.



Weftigan oo uu hogaaminayay safiirka EU-da **Fulgencio Garrido Ruiz** kana koobnaa safiirada dalalka (**UK, Denmark, Sweden, Norway, Finland, Swizerland Iyo Madaxa Xafiiska Hargeysa ee UK**) ayay labada dhinac ka wada hadleen Mawduucyo dhawra oo ay ka mid tahay qabsoomida doorashada , saami qaybsiga kuraasta gobolada, xeerarka doorashooyinka iyo kootada dumarka.

Gudoomiye Baashe ayaa weftiga u xaqiijiyey ka go'naanshahooda in doorashada golaha wakiiladu ku qabsoonto waqtigii loo mudeeyey diyaaarna ay u yihiin inay kuraasta baneeyaan.

Sidoo kale gudoomiyaha golaha wakiiladu wuxuu weftiga u sheegay inay diyaar u yihiin inay ansixiyaan xeerarka doorashada balse arinta keliya ee ay u cadilan tahay ay tahay Saami qaybsiga kuraasta Gobolada oo aanay suurto gal ahayn in ay xildhibaanadu jaaan gooyaan maadaama xildhibaan waliba deegaan ka soo jeedo oo qadiyadaasi tahay mid u baahan wadatashi qaran.

Kulankan oo ay ka hadleen safiirka dhawr ahi ayay dhamaantood shir guddoonka uga mahadnaqeen sida ay uga go'an tahay qabsoomida doorashadu muhiimad gaaar ahna ay arintaas siinayaan weftigoodu. Gebagebadii kulanka ayaa ku dhamaaday is-faham buuxa oo labada dhinac ah.

### **Gudoomiyaha Golaha wakiilada oo Xafiiskiisa ku qaabilay Safiirka dalka Germany u fadhiya Nairobi**

**08 April 2019** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax** ayaa xafiiskiisa kulan kula qaatay wefti ka socda dalka Jarmalka oo ay hoggaaminayso safiirka waddanka Jarmalka u fadhida Kenya Ambassador Annett Günther oo uu weheliyo Safiir ku xigeenkeeda, Mr. Markus Bollmohr.

Ambassador Gunther waxay ka wada hadleen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane Baashe arrinta doorashooyinka, waxay si qoto dheer u lafagureen sidii ay dooraashada u qabsoomi lahayd wakhtii loo asteeyey iyo sidii ka baarlamaan ahaan dhankooda ay

dedaalo dheerada ka sameeyaan wixii kaga beegan gaar ahaan samaynta shuruucda qabyada ah ee la xidhiidha doorashooyiska. Waxay kale oo ka wadaa hadleen sidii qaran ahaan ay hawlaha loo bahaanyahay iska dhameeyeen intaan doorashada wakhtigeeda la gaadhin.



Gudoomiye Baashe waxaa uu si mug iyo miisaan leh ugu wargaliyey inaanay iyaga kursi jaceyl hayn xildhibaanaduna diyaar u yihiin xili kasta oo ay doorasha qabsoonto inay baneeyaan kuraasta fursadna siiyaan dhalinta siyaasiyiinta da'da yar ee raba Inay noqdaan xildhibaan, balse waxaa uu gudoomiye baashe sheegey inay jiraan caqabado ku gedaaman doorashada oo ay ka mid tahay arinta saami qaybsiga kuraasta baarlamaanka taasi oo ah caqabad u baahan in si wada jira oo qaran loo xaliyo, arinta kale ee u baahan in la xaliyana waa arinta komishanka ee xisbiga Dawlada iyo xisbiga mucaaradka ee waddani aanay wali ka heshiin, taasi oo ah arrin iyadu u baahan in laga gaadho xal degdega, Gudoomiye Baashe wuxuu sheegey in ka baarlamaan ahaan ay diyaar ka yihiin xeerarka la xidhiidha doorashada balse ay u taagenyihiin saamiga kuraasta oo aan wali la xalin.

Kulankani wuxuu ku dhamaadey jawi waanagsan, baashena wuxu ku wargaliyey inay arrimaha yaala ee doorashada isha allaah qaran ahaan iyagu dhamaysan doonaan sidii awalba loo dhamaynjirey muranada siyaasida ah, rajaweyna uu ka qabo inay doorashadu xiligeeda ku dhacdo.

Gudoomiye Baashe ayaa si gaar ah Safiirada uga mahad celiyey mashaariicda horumarineed ee ay dalka ka wadaan wadankooda Jarmalku isla markaana ku dhiiri geliyey sidii ay kor ugu sii qaadi lahaayeen.



## **Shir-gudoonka Labada Gole ee Baarlamaanka ayaa kulan la yeeshay Madaxweynihii hore ee Dalka Nigeria**

**05 May 2019** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. **Baashe Maxamed Faarax**, Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Guurtida Md. **Siciid Jaamac Cali** iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada Md. **Axmed-Yaasiin Sh Ali Ayaanle** ayaa maanta kulan Xarunta Golaha Wakiilada kula qaatay Madaxweynihii hore ee dalka NIGERIA **Olusegun Obasanjo** dalka Booqasho laba maalmood ah ku yimi.

**Olusegun Obasanjo** oo 8 sanadood madaxweyne ka ahaa dalka Nigeria isla markaana 4 sano hogaan u ahaa Ururka Midowga qaramada Afrika imikana ah Guddoomiyaha hay'adda Brenthurst Foundation oo ka shaqaysa horumarinta dhaqaalaha Afrika iyo hirgelinta nidaamyada caalamiga ayaa shirgudoonka u sheegay inuu dalka u yimi inuu xog ogaal u noqdo xaalada Somaliland isla markaana uu indho indheynayo xaqiiqada taala dalka si uu gacan uga geysto Halganka Somaliland ugu jirto Himaladooda.

Gudoomiyaha Golaha wakiilada ayaa weftiga u sharaxay dalka Somaliland iyo taariikhdeeda soo jireenka ah waxa uu tilmaamay Gudoomiye Baashe in Somaliland oo 26 Juun 1960kii xornimadeeda ka qaadatay dalka ingiriisku ay la midowday Somaalidii Koonfurta oo talyaani gumaysan jiray isla markaana ay midoobeen 1dii July 1960kii, waxa uu ka waramay wixii ay midowgii kala kulmeen isla markaana ay 18 may 1991kii ay xoriyadoodii dib ugala soo noqdeen soomalidii konfureed ee ay 1960kii la midoobeen.



Waxa uu gudoomiye baashe u sharaxay sida aanay Somaliland u ahayn dal cusub oo hadda la samaynayo ama xuduud cusub qaarada afrika ku soo kordhinaya ee ay waafaqsan tahay mabaadiida Qaramada afrika saldhiga u ah ee salka ay u tahay xuduudihii gumaystuhu qaarada u dejiyey 1884kii.

Warbixin dheer oo gudoomiyuhu xaalada Somaliland ugu sharaxay ayuu sheegay in ay Somaliland ka badbaaday faragelin dibadeed oo ay kaga soo gudbeen Talada odayada

dhaqanka, wadatashi iyo isu tanaasul siyaasadeed taas oo umada reer Somaliland u horseeday inay ku guulaysataan dhisida dalkooda iyo inay ka hirgeliyaan dimuqraadiyad buuxda ooh al cod iyo hal qof ah.

### **Wafti Xildhibaanada Dalka Kenya ka socda oo Dalka yimi isla markaana kulan la yeeshay Golaha**

**17 May 2019** Gudoomiyaha Gudidda Arimaha Dibadda ee Golaha Wakiilada **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)** oo ay weheliyaan gudoomiye kuxigeenka Gudidaas Mudane Cabdicasiis Ismaaciil Ducaale iyo gudoomiye ku xigeenka Gudidda joogtada ah Mudane Axmed Ducaale bulaale iyo xubin Guddida dhaqaalaha ah Xildhibaan Axmed Maxamed Diiriye (Nac nac) ayaa kulan xarunta Baarlamaanka kula yeeshay xildhibaanada ka socda dalka KENYA oo dalka u yimi ka qayb qaadashada maalinta dib ula soo noqoshada Madaxbanaanida Somaliland.

Weftigan xildhibaanada ah ee KENYA ka socda oo qayb ka mid ahina galabta dalka soo gaadhi doonto ayaa waxa hogaaminayay **MP Safiya Cabdi Nuur** iyo Gabadh Ganacsade ah oo reer Somaliland ah oo la yidhaahdo **Sacdiya Cabdi Faarax** waxaana ku wehelinayay 5 xildhibaan oo kale oo laga soo kala doorto county-yada kala duwan ee dalkaas Kenya.



Xildhibaanada iyo Gudoomiyaha gudi hoosaadka arimaha debeda ayaa uga xaal waramay taariikhda Somaliland iyo sida ay dib xoriyadoodii ugala soo noqdeen koonfurta Somalia. Sidoo kale waxa ay u sharaxeen taariikhaha ay wadaagaan KENYA oo ingiriisku wada gumaysan jiray, Waxa ay uga mahadnaqeen safarkoodan iyo inay dalka Somaliland yimaadaan waxaanay.

Waxa iyaguna shirka hadalo ka jeediyey dhamaan xildhibaanadii KENYA ka socday oo tilmaamay inay aad iyo aad ugu faraxsan yihiin waxan ay indhahooda ku arkeen iyo sida aynu u dhisanay dawlad dimuqraadi ah oo horumar badan ku talaabsatay.

Waxa ay tilmaameen inay doonayaan inay abuuraan xidhiidh intan ka dhow oo u dhexeeya labada baarlamaan iyo labada dawladdoodba ah taas oo inoo horseedaysa bay yidhaahdeen inaynu ganacsi labada dhinacba ka imanaya is waydaarsano.

Waxa ay xildhibaanadu carabka ku adkeeyeen inay Somaliland kala shaqayn doonaan dhinac walba culayskana ay saari doonaan sidii ay Ictiraaf caalamka uga heli lahayd maadaama buu yidhi ay iyadu kasbatay wanaagaas MP JARHET MBIOKI oo arintaas ka hadlayay.

Markii kulanku dhamaaday ayaa Xildhibaanada waxa lagu soo wareejiyey xarunta guud loona sharaxay, sidoo kalena Gudoomiyaha Gudida arimaha Debeda ayaa Gudoonsiiyey Hadyad taariikhi ah oo uu ugu talo galay weftiga.

### **Shirgudoonka oo Kulan la qaatay Wefti Qaramada Midoobay ka socda**

**July 18 2019** Shir-gudoonka Golaha wakiilada ayaa kulan maanta la yeeshay wefti Qaramada Midoobay ka socday oo u kuur gelayay Xaalada Xuquuqal Insaanka dalka

Kulankan laba geesoodka ahaa ayaa waxa ka qayb galay Gudoomiyaha Golaha wakiilada **Mudane Baashe Maxamed Faarax**, Gudoomiye kuxigeenka 1aad ee Golaha wakiilada **Mudane Axmed-Yaasiin Sh. Ali Ayaanle**, Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada **Cabdirisaaq Siciid Ayaanle** iyo dhinaca weftiga oo uu Hogaaminayay **Bahame Tom M. Nyanduga** oo ah Khabiir Madax banaan oo UN ah, **Sia Mawalla UNSOM**, **ALICE Ngezahayv UNSOM**, **Marianick koffi OCHA** iyo **Axmed Cismaan Jaamac UNSOM**. Sidoo kale waxa ku wehelinayay La-taliyayaasha Cabdiraxmaan Hirad Jaamac iyo Cabdirisaaq Ibrahim Maxamed

Weftigan ayay ujeedadiisu ahayd xuquuqal insaanka dalka iyo xeerarka khuseeya ee Golahuhu gacanta ku hayo iyo sidii loo dardar gelin lahaa

Gudoomiyaha Golaha wakiilada ayaa weftiga u sharaxay xaalada guud ahaan dalka nidaamka dimuqraadiga ah iyo heerka xuquuqal iinsaanka Somaliland, waxa uu sidoo kale si gaara uga waramay xeerarka arintan khuseeya ee golaha yaala kuwa goluhu ansixiyey iyo kuwa aan xukuumadu weli u soo gudbinin, xeerarkan oo ay ka mid yihiin, Xeerka **Saxaafada**, xeerka **FGM-ka**, Xeerka **Kufsiga** iyo Xeerka **Booliiska**. Gudoomiye Baashe ayaa si gaara ugu mahad celiyey weftiga booqashadooda dalka.





Weftiga ayaa gudoomiyaha iyo golahaba uga mahadceliyey soo dhawayntooda iyo xogaha faahfaahsan ee ay ka siiyeen waxaanay suaalo ka waydiiyeen xeerarka qaar oo gudoomiyaha goluhuna si waafiya ugaga jawaabay.

Weftigan ayaa kulamo la qaadanaya madaxweynaha, Gudoomiyaha Maxkamada sare, Xeer ilaaliyaha Guud, Xisbiyada iyo komishanka xuquuqal iinsaanka Somailand.

### **Shirgudoonka Golaha Wakiilada JSL oo kulan la yeeshay Wefti uu hogaaminayo Safiirka EU-da u qaabilsan Somaliland/Somalia**

**20 July 2019** Gudoomiyaha ayaa kulan la yeeshay Safiirka Cusub ee Midawga Yurub U Qaabilsan Dalalka Somaliland Iyo Soomaaliya **Amb. Nicolás Berlanga Martínez** oo uu wehelinayay Safiirka Jarmalka Ambassador Annett Günther.



Labada safiir iyo gudoomiyaha Golaha Wakiilada ayaa ka wada hadlay arimaha dooraahooyinka soo socda iyo sidii loo dardar gelin lahaa Goluhuna doorkiisa u qaadan lahaa, sidoo kale waxa kulanka layskula soo qaaday barnaamijyada horumarineed iyo mashaariicda ay dalka ka wadaan Jarmalka iyo midowga Yurub.

Gudoomiyaha ayaa uga mahadnaqay safiirada mashaariicda ay dalalkoodu ka wadaan Somaliland isla markaana ku booriyey inay sii wadaan.

### **Safiirka Midawga Yurub (EU) oo Gudoomiyuhu La kulmay**

**20 October 2019** Gudoomiyaha Golaha wakiilada Md. Baasha Maxamed Faarax ayaa Kulan waxa uu la qaatay Safiirka Midawga Yurub (EU) u qaabilsan Somaliland iyo Somalia Ambassador Nicolas Berlanga Martinez oo uu wehelinayay Ambassador Staffan Tillander.



Kulankan ayay labada dhinac kaga wada hadleen Arrimaha u diyaar garowga doorashooyinka aqalka Golaha Wakiilada iyo Golayaasha Deegaanka sidii looga wada shaqayn lahaa fududaynta waxyaabaha ku xeeran iyo caqabadaha taagan.

Sidoo kale waxay ka wada hadleen arimaha geeska iyo gobolka ka jira iyo sidii looga wada shaqayn lahaa horumarka socdana qayb looga noqon lahaa.

Weftigan ayaa sidoo kale xarunta golaha kulan kale kula yeeshay gudida Aragti wadaagta kootada Haweenka iyo beelaha laga tirade badan yahay oo uu gudoomiye u yahay Xildhibaan Ibraahim Mahdi Buubaa waxaanay isku afgarteen sii xoojinta iyo hirgelinta qadiyada Haweenka in loo fududeeyo inay kuraasida baarlamaanka yimaadaan taasna lagu gaadhi karo qoondayn kuraasi loo xidho.

### **Kulan Gudoomiyaha G/Wakiiladu la yeeshay Ururka Dبلوماasiyiinta Madax-banaan,**

**23 October 2019** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax iyo Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka Gudidda Arimaha debeda iyo iskaashiga caalamiga ah ee golaha ayaa kulan la yeeshay Wefti uu Hogaaminayo Xoghayaha Guud ee urur Dبلوماasiyiin madax banaani ku kulmaan inta badana gacan ka geysta una ololeeya wadamada aan aqoonsiga haysan oo marka dalka Booqosho ku joogay Kulankan oo saacado badan qaatay ayaa ku soo gebageboobay isfaham iyo sii dardar gelinta wada shaqayneed ee dalka Somaliland iyo ururkaas Dبلوماasiyiin madax banaan.





## Safaradii Dibada Dalka.

22 September 2019 waxaa Safar ugu dalka Yugaandha Wefti uu hogaaminayo Gudoomiye kuxigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada JSL Md. Axmed-Yaasiin Sh. Cali Ayaanle oo ka socday Golaha Wakiilada

Weftigan ayaa ka qayb gelay shirka Ururka Baarlamaanada Wadamada Barwaaqo Sooranka oo Jamhuuriyada Somaliland Xubin ka tahay kaas oo sanadkan lagu qabanyaa Dalka UGANDA, sidoo kale Ujeeddada Safarkaasi waxa kale oo ka qaybgalka Shirka weheliyay Dar dar galinta siyaasadda guud ee Qaranka ee Arrimaha Dibadda iyo sidoo kale Xoojinta xidhiidhada Dibadda ee Golaha Wakiiladu la leeyahay Barlamaanadda dalalka kale ee Addunka.



Weftiga Gudoomiye kuxigeenka Golaha waxa ku wehelinayay Gudoomiyaha Gudida Arimaha Debedda Axmed N. Kijandhe, Gudoomiyaha Gudida Deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah Md. Maxamed X Yuusuf Waabeeyo, Gudoomiye kuxigenka Gudida Arimaha Dibada C/casiis Ismaaciil Ducaale iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Cabdirisaaq Siciid Ayaanle.

Waftiga oo markuu gaadhay Caasimada dalka Uganda ee Kampala lagu soo dhaweeyey Maamuus dawladeed waxaana Madaarka ku qaabilay oo ku soo dhoweeyay Xildhibaanada Baarlamaanka UGANDA oo ay hormood u yihiin Gudida Arimaha Dibada ee Baarlamaanka dalkaas waxayna ka qaybgaleen Shirka Ururka Wadamada Barwaaqo-sooranka oo 26 September 2019 si rasmiya u furmay.

Mudadii Waftigu dalkaas ku sugnaayeen waxay kulamo la yeesheen:-

- Wasiirka arimaha Dibada ee dalka UGANDA **Mr hon. Sam Kutesa.**
- Afhayeenka Baarlamaanka Uganda **Marwo Rebecca Kadaga,**
- Madaxda Gudiyada Baarlamaanka Uganda.
- Afhayeenka Barlamaanka Dalka Kamaruun **Marwo. Emilia Monjowa Lifak**
- Afhayeenka Baarlamaanka Dalka Tanzania **Mudane Job Ndugai.**
- Gudomiyaha Barlamaanka Kenya **Mudane Ekwee Ethur**
- Gudomiye Kuxigeenka Barlamaanka KoonfurAfrica **Mudane Solomon Lechesa Tsenoli**
- Wufuudihii ka kala socotay wadamada barwaaqo sooranka qaar ka mid ah sida Weftigii Ingiriiska, Weftigii Australia iyo qaar kale waxaanay kala hadleen qadiyada Jamhuuriyada Somaliland iyo danaha dalalkooda iyo Somaliland u dhexeeya.



Safarkaas oo qaadatay muddo sagaal cisho ah waxaa uu kusoo dhamaaday guul iyo horumar weyn oo guud ahaan Somaliland usoo hoyatay waxyaabaha guulahaas laga xusi karana waxaa ka mid ah:

- In markii ugu horaysay ay dawladda Somaliland ka qayb gasho shirweynaha Uururka Barlamaannadda dalalka barwaaqo sooranka ah isla markaana ay codsatay in ay xubin ka noqoto iyada oo codsigii laga qabtay.
- In Wasiirka arrimaha dibaddu ee dalka Uganda uu ka ogolaaday waftiga in Somaliland ka furato xafiis Ganacsi dalka Uganda.
- In dhamaan kulamadii ay waftigu qaateen ee ay la yeesheen madaxda dawladdaha kor ku xusan iyo sidoo kale madaxdii kale ee kasoo qayb gashay shirka sida kuwii ka socday dawladdaha Australia, UK, Malaysia iyo dalalkii kale uu dhamaan kusoo afmeermay is faham iyo wada shaqayn wacan.
- In dawladdaha, Kenya, Tanzania iyo Uganda ay sameeyaan xubno mudanayaal ah oo u olaleeya qadiyadda Somaliland isla markaana si gaar ah uga shaqeeya xubinadda Somaliland ee ka mid noqoshada ururka Barlamaanadda Barwaaqo Sooranka iyo IGAD
- Inay Casuumad ay u fidiyeen, afhayeenadda barlamaanadda, dalalka Tanzania, Camaroon, iyo Uganda ayna iman doonan dalka bilaha soo socda haddii allahu ka dhigo.

## **Kulan aqoon iswaydaarsi Baarlamaanka ka qayb-galay.**

**10 April 2019** ayaa waxa loo soo gebagebeeyey Kulan Hawleed laba maalmood u socday qaar ka mid ah Xildhibaanada iyo Shaqaalaha Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiilada).

Kulankan oo kor loogu qaadayay fahamka Xildhibaanada iyo hawl wadeenada golayaasha ee Dooraka Baarlamaanku ku leeyahay Qorshaha 2030 iyo Yoolasha horumar Waara.



Ka qayb-galayaashii kulanka ayaa si hufan isula falanqeyey shalay iyo maanta sida ugu haboon ee looga qayb qaadan karo iyadoo khubaro aqoon durugsan u leh mawduucyadii la qaadanayay oo isugu jiray ajnebi debeda looga keenay mawduucan Iyo khabiiri Soomaali ah ay si wadajir ah ugu tacliimiyeen ka qayb galayaashii kulan hawleedkan.

## **Shirgudoonka Golaha oo Kulan la qaatay Arday Barata Hogaaminta**

**13 March 2019** Shirgudoonka Golaha Wakiilada ayaa maanta Xarunta Golaha ku qaabilay Koox dhalinyaro ah oo isugu jira wiilal iyo gabdho Barta Maamul wanaaga. Gudoomiyaha Golaha Md. Bashe Mohamed Farah, Gudoomiyaha Guddida Arrimaha Bulshada Mud, Cabdiraxman Cisman Caalin, Xildhiban Axmed M. Diiriye (Nacnac), Xoghayaha Guud ee Golaha Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle iyo Agaasimaha waaxda qorsheynta Cabdinasir Cisman Maxamuud ayaa kulan la qaatay waxaanay uga xaal warameen mudadii ay joogeen kooxdan dhalinyarada ahi golaha Xaalada guud ee dalka Habmaamulka iyi nidaamka sharci dejineed ee dalku heerarka ay marto iyo sidoo kale Nidaamka wada shaqayneed ee Hay'addaha dawlada iyo sida ay ula xisaabtamaan Xukuumada.





Dhalinyaradan barata Tababarka iyo aqoonta maamul wanaaga ayaa waxa Gacanta ku haya Xarunta CPA waxaanay maalintii shalay si la mida kulankan la qaateen Madaxweyne ku-xigeenka dalka JSL mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi ismaaciil Saylici).

## **Golaha Waiilada oo Kulan Wadatashi Laba Maalmood ah u qabtay Xeerka Maydhista Lacagaha**

**23 May 2019** Golaaha Wakiilada ayaa kulan wadatashi (**Public Consultation Workshop**) Laba maalmood socday u qabtay Xeerkan oo lagu soo martiqaaday daneeyayaasha iyo inta uu saamayn doono dhaqan galkiisu ayaa talooyin dheeraada lagu waydiistay si ay waxtar iyo talo badi ugu noqoto Xeerka Maydhista lacagaha oo akhriskii 3aad galay hor yaalana gole weynaha.



kulankan ayay goob joog ka ahaayeen badiba xubnaha gudida dhaqaalaha ee Golaha iyo gudoomiyaha gudidaas Mudane Cumar Axmed Saleebaan (Cumar Sanweyne) iyo xoghayaha guud ee Golaha wakiilada mudane Cabdirisaaq Siciid Ayaane waxa kale oo ka soo qayb galay gudoomiyaha Baanka Dhexe Md. **Cali Ibraahim (Baqdaadi)** Agaasimaha guud ee wasaarada Maalgashiga, Agaasimaha Waaxda Financial Sector-ka ee wasaarada Maaliyada, ku simaha Agaasimaha guud ee Wasaarada Qorshaynta iyo madaxda xawaaladaha iyo baananka gaarka loo leeyahay.

Gudoomiyaha Baanka dhexe Cali Ibraahim iyo Gudoomiyaha gudida dhaqaalaha ayaa ka soo qayb galayaashii shirka ka dalbaday in ay si wanaagsan u contribute gareeyaan qodob dheeraad ah oo xeerkan kaabis loogu sameeyey, isla markaana u sheegay inay mar labaad uga maarmi waayeen inay bulshada iyo hay'addaha maaliyada talo urursi kale kala sameeyaan.

Gudoomiyaha Gudida Dhaqaalaha **Cumar Sanweyne** Xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada C/risaaq Ayaanle iyo Xildhibaan Siciid Maxamed Cilmi oo gudida dhaqaalaha ka tirsan ayaa faahfaahin ka bixiyey iyo sharaxaad kooban asbaabta keentay in mar kale bulshada wax laga waydiiyo.

Waxaana halkaas qodob qodob iyo nuxurka xeerka ka soo qayb galayaasha ugu sameeyey faahfaahin dheeraada Labada Lataliye ee Dhanka Sharciga ee Golaha wakiilada JSL Mudane Cabdiraxmaan Hirad Jaamac iyo Cabdirisaaq Maxamed Siciid oo soo naaqishay Xeerka.

Wadatashigan Bulsheed ee loo qabtay xeerka oo laba maalmood qaatay 22-23 May 2019 ayaa si habsami leh loogu soo xidhay Huteel Maansoor ee magaalada Hargeysa.

## **Golaha Deegaanka Degmada Burco oo kulan la yeeshay Gudoomiyaha Golaha wakiilada**

**25 March 2019** ayuu Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JMd. Baashe Maxamed Faarax kulan balaadhan la qaatay Xildhibaanada Golaha Deegaanka Degmada Burco oo uu gudoominayay Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Burco ahna Duqa magaalada Burco Mudane Maxamed Yuusuf Cabdiraxmaan (Muraad) iyo 16 xildhibaan oo ka tirsan golahaas.

Shirka waxa Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ku wehelinayay Gudoomiyaha Gudi hoosaadka Arimaha Gudaha Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaaki) Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane Cabdirisaaq Siciid Ayaanle, Gudoomiyaha Gudi Hoosaadka Deegaanka iyo khayraadka Dabiiciga ah Mudane Maxamed X Yuusuf (Waabeeyo) iyo xildhibaan Saleebaan Diiriye Bare oo ka tirsan Gudi hoosaadka Dabagalka Hantida Qaranka.

Golaha Deegaanka ee Degmada Burco ayaa Golaha Wakiilada u soo gudbiyey talo bixin ku saabsan Xeerka Ismaamulka gobolada iyo degmooyinka Xeer Lr. 23/2001 iyo Xeerka

midaynta Cashuuraha Xeer Lr.12/2000. Nuxurka qoraalka ay u soo gudbiyeen golaha ayaa wuxuu ahaa in Goluhu hoos u eego Maamul daadejintii dastuurku sameeyey iyo adeegyada bulshada ee golayaaasha Deegaanka dastuurka iyo xeer Lr.23 siiyey inaan Dawlada dhexe shuruuc kale ku sharciyaysanin, sidoo kalena waxay talo bixin ka geysteen Xeerka Midaynta cashuuraha oo ay sheegeen in 10%ka Kastamada iyo 12.5 ka Kabka dawlada hoose inta la mideeyo in degmooyinka dalka si siman loogu qaybiyo.

Mayorka iyo xildhibaanadii madasha saaka ka hadlay ayaa ka cawday iin Xoolaaha oo Burco khayraad u ah aanay ka helin wixii ay xaqa u lahaayeen oo ay ka qatan yihiin.

Gudoomiye Baashe M Faarax ayaa Golaha Deegaanka Burco uga mahadnaqay sida asluubaysan ee sharciga ah ee ay gartooda u akhristeen goluhu isla markaana aanay marnaba ka gole ahaan aqbalaynin in dastuurka sharci ka hor imanayaa uu golohooda dhaafo isla markaana xaqa iyo xuquuqda golayaaasha deegaanku leeyihiin ay ka shaqaynayaan sidii ay u heli lahaayeen.

## **Appendix**

### **Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiiladda:-**

No	Magacayada Xildhibaanka	Gobolka/Degmadda
1.	<i>Gud. Md. Baashe Maxamed Faarax</i>	G. Sool, Degmada L/canood
2.	<i>Gud. Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle</i>	G. Awdal, Degmada Boorama
3.	<i>Gud. Md. Dr. Cali Yuusuf Axmed</i>	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
4.	Md. Abokor C/raxmaan Good	G. Awdal, Degmada Borame
5.	Md. Dr. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
6.	Md. Axmed Ducaale Bulaale	G. Sool, Degmada Ceynabo
7.	Md. Axmed Max'ed Diiriye (Nacnac)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
8.	Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhari)	G. Sanaag, Demada Ceel-afweyn
9.	Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
10.	Md. Cali Max'ed Aadan (Calibarre)	G. Sanaag, Degmada Xiingalool
11.	Md. Max'ed Baaruud Shide(Qamac)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
12.	Md. Max'ed Cismaan Max'ed (Bulqaas)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
13.	Md. Cumar Axmed Saleebaan(Sanweyne)	G. Tog-dheer, Degmada Burco
14.	Md. C/laahi Ismaciil Faarax	G. Tog-dheer, Degmada Burco
15.	Md. Xuseen Axmed Caydiid	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
16.	Md. Ibraahim Axmed Reygal	G. Sool, Degmada Ceynabo
17.	Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
18.	Md. Siciid cilmi Rooble	G. Saaxil, Degmada Berbera
19.	Md. Max'ed X.Yusuf Axmed (Wabeyo)	G. Tog-dheer, Degmada Oodweyne
20.	Md. Max'ed X.Max'uud Cumar Xaashi	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
21.	Md. Max'ed Xuseen Xaaji Ciise	G. Saaxil, Degmada Berbera
22.	Md. Max'ed Jamac Cabdi	G. Sool, Degmada L/canood
23.	Md. Max'ed Cali Xirsi	G. Tog-dheer, Degmada Burco
24.	Md. Prof. Max'ed Cumar Aadan Jiir	G. Tog-dheer, Degmada Burco
25.	Md. Mahdi Xuseen Cadar	G. Awdal, Degmada Borame
26.	Md. Max'uud Axmed Obsiye	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
27.	Md. Aadan Xaaji Diiriye Dirir	G. Saaxil, Degmada Berbera
28.	Md. Aadan Muxumed Hoori (Matan)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
29.	Md. Axmed Barkhad Obsiye	G. Awdal, Degmada Borame
30.	Md. Axmed Xasan Adan (Weysa cade)	G. Saaxil, Degmada Berbera
31.	Md. Axmed Max'ed Nuur	G. Tog-dheer, Degmada Oodweyne
32.	Md. Baar Siciid Xaaji Faarax	G. Sanaag, Demada Dhahar
33.	Md. C/raxman Muuse Jamac	G. Sool, Degmada L/canood
34.	Md. C/casiis Ismaaciil Ducaale	G. Tog-dheer, Degmada Burco
35.	Md. C/kariim Aw Cali Shabeel	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
36.	Md. C/qaadir X. Ismaciil jirde	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
37.	Md. C/qaadir Jamac Xamuud	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
38.	Md. C/raxmaan Max'ed Jamac (A-xoog)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
39.	Md. Cali Obsiye Diiriye (Cali Gebiley)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
40.	Md. Cali X. Max'ed Muuse	G. Tog-dheer, Degmada Burco
41.	Md. Cali Sh. Ibraahim Aareeye	G. Awdal, Degmada Seylac
42.	Md. Farxan Max'ed Cali	G. Tog-dheer, Degmada Burco
43.	Md. Xasan Xuseen Shide	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
44.	Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf	G. Tog-dheer, Degmada Burco
45.	Md. Maxamed Jaamac Cabdi (Gaaxnuug)	G. Saaxil, Degmada Berbera

46.	Md. Max'ed Axmed Max'ed (Dhakool)	G. Sool, Degmada L/canood
47.	Md. Max'uud Dhunkaal Guutaale	G. Sool, Degmada Ceynabo
48.	Md. Axmed Maxamed Caateeye	G. Sool, Degmada L/canood
49.	Md. Max'ed Saalax Cige	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
50.	Md. Max'uud Jaamac X.Cilmi (Dable)	G. Saaxil, Degmada Berbera
51.	Md. Siciid Cartan Cisman	G. Saaxil, Degmada Berbera
52.	Md. Cabdi Maxmed Jaamac (Gaagaale)	G. Awdal, Degmada Borame
53.	Md. Bashiir Sh.Xuseen Tukaale	G. M/jeex, Degmada Gabiley
54.	Md. Saleebaan Diiriye Barre	G. Sool, Degmada Ceynabo
55.	Md. C/raxmaan Cismaan Caalin	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
56.	Md. Xaashi Xuseen Caabi	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
57.	Md. Faraax Max'uud Cabdulle	G. Saaxil, Degmada Berbera
58.	Md. Jaamac Xasan Aadan	G. Tog-dheer, Degmada Burco
59.	Md. Mahdi C/laahi Max'uud	G. Awdal, Degmada Borame
60.	Md. Ibraahim Mahdi Buubaa	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
61.	Md. Xuseen Maxamed Cige	G. Tog-dheer, Degmada Burco
62.	Md. Max'ed Faarax Qabile	G. Saaxil, Degmada Berbera
63.	Md. Max'ed Jamac Cali	G. Tog-dheer, Degmada Burco
64.	Md. Muuse Max'ed Ismacil (Hoos u jeed)	G. Awdal, Degmada Borame
65.	Md. Naasir X. Cali Shire	G. Tog-dheer, Degmada Burco
66.	Md. Siciid Maxamed Cilmi	G. Sool, Degmada L/canood
67.	Md. Ibraahim Caraale Cabdi	G. Sanaag, Demada Ceel-afweyn
68.	Md. Dr. Maxamed Axmed Cabdi (Carabayto)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
69.	Md. C/laahi Axmed Yuusuf (Madar)	G. Awdal, Degmada Borame
70.	Md. C/laahi Xuseen Cige (Blacky)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
71.	Md. Siciid Warsame Ismaaciil	G. Sool, Demada Ceynabo
72.	Md. Wali Axmed Xaawo	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
73.	Md. Axmed Faarax Jooj	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
74.	Md. C/qaadir Jibril Tukaale	G. Awdal, Degmada Borame
75.	Md. Cabdi Hiirad Warbaa Faahiye	G. Sool, Degmada L/caanood
76.	Md. Maxam'ud J. Warfaa	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
77.	Md. Xasan Muuse Hufane	G. Awdal, Degmada Borame
78.	Md. Xaamud Cisman Cigaal	G. Saaxil, Degmada Berbera
79.	Md. C/raxman Maxamed Jaamac	G. Awdal, Degmada Borame
80.	Md. Ismaaciil Maxamed Xasan	G. Tog-dheer, Degmada Burco
81.	Md. Axmed Cabdi Kaahin	G. Awdal, Degmada Saylac
82.	Md. Yuusuf Liibaan Cumar	G. Sanaag, Demada Ceergaabo



## Liis-ka Hawl-wadeenada iyo Shaqaalada Golaha Wakiillada

No.	Magac	Shaqada/Xilka
1.	Abdirisak Sa'ed Ayanle	Xoghayaha Guud ee Golaha
2.	Jamal Jama Hassan	Xoghaye ku-xigeenka Golaha
3.	Awad Ali Mohamed	Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka, Golewaynaha iyo Gudiyada
4.	Farah Ibrahim Gamute	Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka
5.	Mahamuud Sulamen Omer	Agaasimaha Waaxda ITga iyo Cilmi-baadhisto
6.	Abdinasir Osman Mahamoud	Agaasimaha Waaxda Qorsheynta
7.	Hibo Mohamed Ibrahim	Agaasimaha Waaxda Xusuus-dhowrka
8.	Ismahan Yusuf Ibrahim	Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha
9.	Ahmed Mohamed Eige	Agaasimaha Waaxda Hab-maamuuska iyo Amniga
10.	Sulieman Abdisitar Dubad	Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Dadweynaha iyo Warbaahinta
11.	Yusuf Habib Husein	Agaasimaha Waaxda Laybareeriga
12.	Faysal Ibrahim Esse	Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Gobolada
13.	Hamse Mohamoud X. Muuse	Agaasimaha Xafiiska Miisaaniyada
14.	Mustafe Mohamed X. Dahir	La-taliyaha Sharciga
15.	Mubarik Farah Warsame	La-talyaha Siyaasada (Policy Advisor)
16.	Sa'ed Farah Hashi	La-taliyaha Mashaariicda
17.	Mohamed Abdirahman Ducale	La-taliyaha Luuqadaha
18.	Abdirahman Hirad Jamac	La-taliyaha Sharciga (Legal Advisor)
19.	A/risaq Muse Idle	La-taliye
20.	Ahmed Ali Kahin	La-taliyaha Sharciga
21.	Huda Mohamed Ahmed	Madaxa Xafiiska Xoghayaha Guud iyo Madax-qaybedka Gudiyada
22.	Abdillahi Abdi Adan	Madax-qeybedka Hadal-qoraalka iyo Xoghaynta Gudida Cadalada
23.	A/Rahman Jama Nur	Madax-qeybedka Warbahinta iyo Xoghaynta Gudida A. Gudaha
24.	Mohamed Sa'eed Husein	Madax Xisaabaadka (Head of Accountant)
25.	----- Cabdi Ismaaciil Xawaadle	Xisaabaadka
26.	Asiya Rashiid Egge	Madax qaybeedka Shaqaalaha
27.	Aydarus Ega Khayre	Madaxa Daabacaadaha
28.	Sa'ed Jirde Haybe	Muuqaal qaade (Camera Man)
29.	Mahad Omer Sa'eed	Madax-qeybeedka Golewaynaha iyo Xoghaynta Gudidda I&DHQ
30.	Seaad Yasin Ismcil	Madax-qeybeedka Waaxda Xusuus Dhowrka.
31.	Khadra Hussein Jama	Madax-qeybeedka Waaxda Shaqaalaha
32.	Mustafe Mohamed Hassan	Madax-qeybeedka Cilmi Baadhista
33.	Wacaysa Ali Ahmed	Madax-qeybeedka Qorsheynta
34.	Ali Axmed Ibrahim	Xoghaynta Gudidda Sirdoonka iyo Amniga
35.	Ayanle Ahmed Abdi	Xoghaynta Gudidda Joogtada iyo Anshaxa
36.	Ridwan Abdillahi Abdi	Xoghaynta Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicga
37.	Maxamed Yusuf Ayanle	Xoghaynta Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
38.	Bade Cali Habane	Xoghaynta Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka
39.	A/wahab Ahmed Mohamed	Xoghaynta Gudidda Arrimaha Didabada
40.	Sahal Guled Xadi	Xoghaynta Gudidda Arrimaha Bulshada
41.	Amal Ahmed Iman	Xoghaynta Xafiiska Xuus-dhowrka
42.	Mohamed Mohamud Osman	Xafiiska Waaxda Qorsheynta
43.	Hodan Adam Siciid	Ururinta iyo habeynta Xeerarka iyo Xogtooda
44.	Khadra Suber Nux	Xoghayn Xiiska Xoghayaha Guud
45.	Abdirkarim Muse Ibraahim	Xoghayn
46.	Abdiaziz Nur Ali	Madax-qeybeedka Hab-maamuuska
47.	Mustafe Nur Farah	Xoghayn

48.	Mohamed Hussein Eilmi	Xoghayn
49.	Saado Abdillahi Abdi	Xoghayn Xafiiska Hadal-qoraalka
50.	Warsame Bashe Farah	Xoghayn
51.	Fadxiya Cali Xasan	Xoghayn
52.	Hamse Nux Ahmed	Xoghayn
53.	Mohamed Hassan Mohamed	Kamarad Duube
54.	Ahmed Osman Farah	Xoghayn
55.	Dheg Adan Bile	Xirfadle dabka iyo Electronika
56.	Nasra Mawliiid Cabdi	Xoghayn
57.	Guled Ahmed Jama	Xirfadle
58.	Shukri Ahmed Abdillahi	Xoghayn
59.	Ali Mohamed Hussein	Xoghayn
60.	Omer Mohamed Aden	Xoghayn
61.	Deeq Ali Aareeye	Xoghayn
62.	A/qani Mustafe Hassan	Xoghayn
63.	Ahmed Farah Bodhle	Xoghayn
64.	Sidiq Mux'ed Axmed	Dareewal
65.	Siciid Cabdi Warsame	Dareewal
66.	Abdi Mahamoud Abdillahi	Dareewal
67.	Mohamed Hassan Diriye	Dareewal
68.	Fu'ad Omer Bare	Dareewal
69.	Mohamed Qasin	Dareewal
70.	Mohamed Muse Hassan	Washman
71.	Xasan Cali Jibril	Beer-fale
72.	Fosiya Osman Aw-Ali	Nadiifiso
73.	Safi Siyad Aw-Abdi	Nadiifiso
74.	Sahra Muse Hassan	Nadiifiso
75.	Fosiya Mahamoud Osaman	Nadiifiso
76.	Farhan Hise Mohamed	Nadiifiso
77.	Fahima Ahmed Guled	Nadiifiso
78.	Koos Ahmed Nur	Nadiifiso
79.	Hinda Abdi Ismail	Nadiifiso
80.	Miski Muhumed Jamac	Nadiifiso
81.	Sulekha Ali Hassan	Nadiifiso
82.	Fadumo Hassan Ismail	Nadiifiso
83.	Safiya Ahmed Mohamed	Nadiifiso
84.	Saynab A/rahman Mohamed	Nadiifiso
85.	Saynab Kosar Husein	Nadiifiso
86.	Samda Suleyman Warsame	Nadiifiso
87.	Sulekha Yusuf Ismail	Nadiifiso
88.	Shamis Mohamed Muse	Nadiifiso
89.	Yasmin Mohamed Hassan	Nadiifiso
90.	Hodan Ibrahim Abdillahi	Nadiifiso
91.	Fardus Mohamed Hassan	Nadiifiso
92.	Aasiya Maxamed Aw-Cali	Nadiifiso
93.	Ibrahim Sa'eed Ayanle	Madaxa Xafiiska Gobolka Tog-dheer
94.	A/wahab Ahmed Mohamed	Xafiiska Gobolka Tog-dheer
95.	Ilhaan Abdi Warsame	Xoghaynta Xafiiska Gobolka Tog-dheer
96.	Mahamoud Mohamed Omer	Madaxa Xafiiska Gobolka Sanaag
97.	Mohamed Ali Yusuf	Xafiiska Gobolka Saanag



98.	A/rahman Mohamed Yusuf	Madaxa Xafiiska Gobolka Saaxil
99.	A/karim Omer Jama	Madaxa Xafiiska Gobolka Awdal
100.	Abdillahi Nur Farah	Madaxa xigeenka Xafiiska Gobolka Awdal
101.	Muxiyadiin C/raxmaan Muuse	Madaxa Xafiiska Gobolka Sool
102.	Mohamed A/Dahir Jama	Madaxa xigeenka Xafiiska Gobolka Sool
103.	Sa'eed Abdule Gafane	Washman
104.	Mohamed Abdi Hussein	Washman
105.	Bare Mohamed Hassan	Washman
106.	Ali Abdi Dalmar	Washman
107.	A/fatah Yusuf H.Ali	Washman
108.	Fosiya Osman Abdillahi	Nadiifiso
109.	Saynab Jama Hirad	Nadiifiso
110.	Deqa H. Mohamed Ibrahim	Nadiifiso
111.	Fadumo Sa'eed Eilmi	Nadiifiso
112.	Halimo Mohamoud Mohamed	Nadiifiso